



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Juun 7, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Qoraallada Wax iska dhaafida Oo la soo dhejiyay si Faallo looga dhiibto

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ayaa codsanaya faallooyin ku saabsan wax ka beddelka 1915 (c) # 0375 Wax ka dhaafida Dadka waaweyn #0117 Wax ka dhaafida Carruurta, #0565 Wax ka dhaafida Carruurta Caafimaad ahaan Wax ku lugta leh, #40193 Tusaalaha wax iska dhaafida Caafimaad ahaan la Nugul yahay, iyo #40194 Tusaalaha Wax iska dhaafida Hab-dhaqanka. Isbeddelada waxaa ka mid ah:

- Cusbooneysiinta tixraacyada oo ka socda DHS oo ku aadan ODHS iyo ku darista Oregon ee Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee guud ahaan inta lagu jiro codsiga wax iska dhaafida.
- Cusbooneysiinta luqadda ee ku saabsan dib u eegida OHA ee warbixinada xaqiijinta tayada ee ODDS.
- Cusbooneysiinta luqadda ee ku saabsan in halisuhu ay is waafaqsan yihiin guud ahaan inta lagu jiro codsiga wax iska dhaafida.
- Cusbooneysiinta luqadda ee dhanka tallaabooyinka waxqabad.
- Cusbooneysiinta tixraacyada ee ku aadan Guddiga Horumarinta Joogtada ah si ay uga turjunto sida wax loo qabto ee hadda jira.
- Marka ay xaalad degdeg ah go'aamiso ODDS, oggolow shuruudaha fool ka fool ah ee loogu talagalay kulamada qorsheynta adeega in la iska dhaafto oo saxiixyada qorshayaasha adeega ay noqdaan kuwo dhanka afka ah ama email ahaan ah.

Marka lagu daro isbeddelada kor ku qoran, #0565 wax ka dhaafida Carruurta Caafimaad ahaan Wax ku lugta leh, #40193 Tusaalaha wax iska dhaafida

Caafimaad ahaan la Nugul yahay, #40194 Tusaalaha Wax iska dhaafida Hab-dhaqanka ayaa sidoo kale soo jeedinaya:

- Ka saarida qaraabadu in ay noqoto mid la dooranayo oo loogu talagalay bixinta adeegyada Jidka Loo maro Shaqada 'Employment Path' si loo waafajiyo sida wax loo qabto ee hadda jira. Ma jirto qaraabo hadda bixinaysa adeegyada Jidka Loo maro Shaqada 'Employment Path' oo la sii marayo wax ka iska dhaafidani.

Wax iska dhaafida 1915 (c) waxaa laga helayaa [bogga internet-ka ee Mashruuca Compass ee ODDS](#), ee hoos yimaada halka ay ku qoran yihiin Wax iska dhaafida iyo Xeerarka.

Noocyada daabacan ee wax iska dhaafida waxaa la soo geliyay Barnaamijyada Naafanimada Korrinka ee Bulshada ee degaanka (<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/county-programs.aspx>) iyo Hay'adaha Adeegyada Taageero (<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/Support-Services-Brokerages.aspx>). Noocyada daabacan ayaa sidoo kale laga heli karaa Joli Schroader, Falanqeyaha Wax iska Dhaafida Medicaid/Qorshaha Gobolka, 503-507-2083, joli.r.schroader@dhsosha.state.or.us.

Qaybaha daneynaya waxaa laga codsanayaa in ay faallooyinka ku soo gudbiyaan iyaga oo adeegsanaya mid ka mid ah laba hab: Email ugu soo dir odds.info@state.or.us ama soo dir faallooyin qoraal ah oo lagu soo hagaajinayo ODDS Medicaid Waiver/State Plan Analyst, 500 Summer Street NE E-09, Salem, OR 97301.

Wakhtiga kama dambaysta ah ee loo qabtay faallooyinku waa Luulyo 7, 2021. Jawaabaha boostada waa in la helaa taariikhdani si loo tixgeliyo.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriiir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.